FAAFIN DEGDEG AH

9ka Luulyo, 2020

XIDHIIDHKA WARBAAHINTA

Margaux Weeke
Margaux.Weeke@portlandoregon.gov

Mo Kantner
mo@newamericaneconomy.org
(858) 401-0298

Magaalada Portland waxa ay isticmaashaa Cilmibaadhis si ay u Hirgaliso Tallaabooyin ka Caawimada COVID-19 taasoo ay qayb ka yihiin dadka Soo galootiga ah

Cilmi baadhis cusub oo ay soo saareen New American Economy waxa ay sheegaysaa in dadka soo galootiga ahi ay kaalin mihiima ka ciyaaraan shaqo abuurka iyagoo ah markaasi 32.9 boqolkiiba dadka leh ganacsigayda Mertigalinta iyo Dalxiiska iyo 20.9 boqolkiiba dadka leh ganacsiyada Adeegyada Guud ee Portland.

Portland, AMA – Cilmi baadhis cusub oo ay samaysay New American Economy (NAE) oo lasoo daayay maanta iyadoo lala hawl galaayoMagaalada Portland, waxa ay sheegaysaa sida soo galootigu ay qayb mihiim ah uga yihiin dadaalka rogaal celineed ee degdegga ah ee Portland waana iyagu gaar ahaan u nugul sababtoo ah iyaga oonu gaadhayn caawimada fedearalku, caqabad xagga luuqadda ah, iyo khattar dheeraad ah oo ay ugu jiraan inay qaadaan caabuqa maadaama oo ay safka hore kaga jiraan la dagaalamida cudurka.

Natiijooyinka ugu mihiimsan ee ay soo saartay warbixinta waxa ka mid ah:

- **Soo galootiga waxa ay ka shaqeeyaan warshadaha mihimka ah waxayna ay ka ciyaaran door mihiim ah oo qayb laxaadleh ka ciyaara habsami socodka Portland iyo dalkba laakiin waxa ay ugalisaa khattar dheeraad ah inay qaadaan caabuqa.** Inkastoo kaliya ay boqolkiiba 13.5 ay ka yihiin dadka magaalada daggan markii tiro koobka la sameeyay 2018, soo galootigu waxa ay yihiin 21.1 boqolkiiba shaqaalaha ka shaqeeya Adeegga Cunnada iyo Hudheelada iyo 20.1 boqolkiiba shaqaalaha ka shaqeeya Gaadiidka wax rara iyo Bakhaarada ee Portland.
- **Soo galootigu waxa ay qayb mihiim ah ka ciyaaraan shaqo abuurka Portland gudaheeda, laakiin waxa ay waajahaan caqabado dhaqaale oo aad u waawayn kuwanoo iyagu ay sababtay dhaqaalaha istaagay.** Soo galootigu waxa ay yihiin 32.9 boqolkiiba dadka leh ganacsigayda Mertigalinta iyo Dalxiiska, 20.9 boqolkiiba dadka leh ganacsiyada Adeegyada Guud iyo 16.4 boqolkiiba dadka leh ganacsiyada Daryeelka Caafimaad.
- **Agabka loo baahdo xilliyada xaaladda degdegga lagu jiro oo markaasi iyagu dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan ku habboon dadkaasi ayaa loo baahan yahay.** 2018 kii in ka badan 28 boqolkiiba oo ah dadka soo galootiga ah ama 24,510 qof, oo ku nool Portland ayaa ay luuqadooda Ingiriisigu fiicnayn. Shanta luuqadood ee ugu badnaa dadkaa dhexdooda ee guryaha ay kaga hadlaan ingiriisiga marka laga tago waxa ay ahaayeen: Isbaanish (32 boqolkiiba),

Fiitnaamiis (21.3 boqolkiiba), Af shiinaha (13.7 boqolkiiba), Af ruush (8.8 boqolkiiba), iyo Af yukrayn iyo afaf kaloo la xidhiidha (3.3 boqolkiiba).
- **Helitaanka daryeel caafimaad iyo adeegyo caafimaad waa mid aad ugu mihiim ah dadka daggan Portland inta uu cudurkani jiro.** 2018 kii 44,101 qof oo daggan Portland waxa ay ahaayeen bilaa caymis, in kabadan 28 boqolkiiba dadkaasi waxay ahaayeen soo galootiga.

Magaalada Portland mid ayaa ay ka tahay laba iyo toban bulsho kuwaasoo iyagu laga dhex sameeyay cilmi baadhista NAE si markaasi tallaabooyin ka rogaal celineed ee degdegga ah dhaqan ahaana ku habboon ay qay ugu noqdaan dhammaan dadka daggan Portland, hadii ay soo galooti yihiin iyo hadii kaleba. Warbixinta Cilmi baadhista ee ugaarka ah Portland waxa ay sheegaysaa dadka soo galootiga ah ee kala duwan ee kunool magaalada waxayna isku dayi doontaa udoodida, abuuritaanka iyo hawlgalinta rogaal celin maxalli ah ee xaaladdan degdegga ah oo ay ku jiraan dadka oo dhan.

“COVID-19 ku waxa uu muujiyay sida ay mihiimka u tahay in lala sameeyo xidhiidh dhaqan ahaan ku habboon koox kasta qaab wakhtiyaysan—waxa aynu ubaahanahay in qofkasta oo Portland ku nooli inuu helo xogta nafta lagu badbaadinaayo iyo taageero bulsheed,” waxa sidaa tidhi Guddoomiye Chloe Eudaly. “Cilmi baadhistan cusub ee New American Economy waxa ay taageeri doontaa dadaalkayaga aanu isugu dayayno inaanu gaadhno bulshada soo galootiga ah ee Portland iyo inaanu isku dayno inaanu kaabno mashaariicda federaalka.”

“Dadka soo galootiga ah iyo kuwo qaxoontiga ah ee ka mid ah dadka daggan Oregon waxa ay qayb mihiim ah ka qaataan gobolkeena dhaqaalihiisa iyo dhaqankiisaba.” Waxa sidan yidhi Touk Keo, Kormeeraha Soo galootiga iyo Qaxoontiga ee Magaalada Portland. “Cilmi baadhista ay samaysay NAE waxa ay innaga caawin doontaa inaynu kiis adag usamayno sida ay Magaalada Portland ay uwadi doonto inay ula shaqayso bulshooyinkaa, usiiso caawimo qiimo leh iyo ugana taageerto inay korto, gaar ahaan inta lagu gudo jiro xaaladan caafimaad darro ee qaran ka soo waajahday.”

Ka akhri warbixinta oo dhammastiran halkan

Xog ku saabsan New American Economy

New American Economy (NAE) waa urur udooda sameeyana cilmi baadhisyo aan siyaasad xisbi gaar ah ku salaysnayn waxaan loo aasaasay inuu baro, xoojiyo taageerana siyaasad sameeyayaasha, dadka saamaynta leh iyo muwaadiniinta dalka oo dhan kuwaaso iyagu arkaaya faa’idooyinka dhaqaale iyo bulsho ee ay leedahay dib uhabaynta isu socodka. NAE waxa ay abuurtay isbahaysi ka kooban hogaamiyayaal ilbaxnimo, ganacsi iyo dhaqan kuwaasoo iyagu siyaasada dhinac walba kaga jira mattalan gabi ahaan 50 gobol. NAE waxa ay kiiskeeda ah dib u habaynta maskaxaysan ee isu socodka ku meel marinaysaa afar siyood: 1) waxa aanu isticmaalaa **cilmi baadhis xooggan** si aanu u qayaxno saamaynta isu socodku ku leeyahay dhaqaalaha, 2)annagu waxaanu **abaabulaa geesiyaal** dadka jirrid u ah iyo dadka saamaynta leh si taageero loogu abuuro isu socodka, 3)Annagu waxaanu **la hawl galaa hoggaamiyayaasha gobolka iyo kuwa maxalliga ah** si aan ugu doodno siyaasadaha taageeraya doorka mihiimka ah ee soo galeetigu ka ciyaaraan gobolka gudihiisa, iyo 4) waxa aanu tusnaa **waxayaalaha soo galeetigu ay ku soo biiriyeen dhaqanka Maraykankaa**nnagoo isticmaalaynaa filino, cunnooyin, ciyaaro, qosol qosols. iyo waxyaalo kale.

Booqo www.newamericaneconomy.org si aad xog dheeraad ah uga barato.